

TALLAALADA TDAP HARGABKA 'FLU' INTA LAGU JIRO URLAHAAN-SHAHA

ISKU DAYGAAGA UGU WANAAGSAN SI LOO ILAALIYO ILMAHAAGA



MAANTA WAXAANU KU SIIN DOONAA LABA TALLAAL – TDAP IYO HARGABKA 'FLU'.


MIYAANU SUGI KARNAA ILAA IYO INTA UU ILMUHU KA DHALANAYO?



WAXAAD ILMAHAAGA SIINTA KARTAA ILAALINTA UGU FIICAN MARKA LAGU JIRO BILAHA UGU HORREEYA EE NOLOSHIISA IYADA OO HADDA LA QAADANAYO TALLAALADANI.

Tallaalka Tdap wuxuu ilmahaaga ka ilaaliyaa pertussis, oo sidoo kale loo yaqaan xiiq-dheerta. Carruurta qabta jiradani waxay yeelan karaan in ay ku adkaato neefsashadu. Dadka waaweyni waxay cudurka ku faafin karaan carruurta iyaga oo qufaca inta badan ma oga in ay qabaan cudurka.

Hooyooyinka filaya in ay wax dhalaan ayay u badan tahay in ay la kulmaan jiro daran oo ka soo gaarta hargabka 'flu', taasi oo horseedi karta ilmaha oo la dhalo waqti hore.



TALLAALADANI MIYAY BADBAADO U LEEYAHAY ILMAHAYGA?

TALLAALADAASI WAA KUWO BADBAADO LEH ISLA MARKAANA ADIGA IYO ILMAHAAGA KA DHIGAYA KUWO CAAFIMAAD QABA.

WEYDII DARYEEL BIXIYAYAAGA CAAFIMAADKA SIDII AAD U HELI LAHAYD TALLAALADAASI BADBAADADA!

WAX BADAN KA OGWOW!
<https://go.usa.gov/xmafc>



Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Barnaamijka Tallaalka Oregon kala xiriiir 971-673-0300 ama email u dir imm.info@state.or.us. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.